



Kusoo dhawoow ED

Wanju wanju, nidja

Waxaan u mahadcelineynaa dadka reer Whadjuk ee qaranka Noongar, mas'uuliyiinta soo jireenka ah ee dhulka aan ka shaqeyno, waxaana ixtiraameynaa cuqaashii hore iyo kuwa hadda joogaba.

Perth Children's Hospital waxaa sidoo kale loo yaqaanaa PCH. Waaxda xaaladaha degdega ah waxaa sidoo kale loo yaqaanaa ED.

Waxaan halkaan u joognaa inaan ka caawino ilmahaaga inuu helo daryeelka uu u baahan yahay.

Waxaan daryeelnaa carruurta da'doodu tahay 15 ama wixii ka yar ee qaba xaaladaha degdeg ah ee caafimaadka ama dhimirka. Waxaa si lacag la'an ah ku hela muwaadiniinta ama dadka degan Australia.

Tan waxa lagu kordhin karaa da'da 18, **haddii ay hore u qabeen xaalad caafimaad** oo ay weli daryeel ka helayaan PCH oo ayna u imaanayaan ED xaalad la mid ah.



Codso turjubaan haddii aadan fahmin ama si uu kaaga caawiyo inaad nala hadasho. Adeeggu waa lacag la'an.

Waqtiyada sugitaanka

Waxa ay noqon kartaa mid mashquul badan Waaxda Xaalada degdega iyadoo ay jiraan carruur badan oo xanuunsan oo sugaya in la arko. Carruurta ugu daran dhanka xanuunka ayaa marka hore la arkaa. Sida layskugu xigo iyo waqtiyada sugitaanka waa isku mid haddii aad ku timaad ambalaas. Wuxaad ka eegi kartaa wakhtiga sugitaanka ugu badan ee hadda jira shaashadaha ku dhagan qolalka sugitaanka.

Fadlan noo sheeg haddii aad qorsheyneyso inaad baxdo ka hor intaanan daweyn ilmahaaga.



Maxaa ka dhaca gudaha Waaxda Xaalada Degdega



Kala soocida

Kala soociddu waxay ka caawisaa shaqaalaha inay go'aan ka gaaraan sida ugu dhakhsaha badan ee ilmahaagu ugu baahan yahay inuu u arko dhakhtar. Way eegi doonaan ilmahaaga waxayna ku weydiin doonaan su'aalo.



Gelida Waaxda Xaalada Degdega

Adiga iyo cunugaaga waxaad markaas gelid doontaan gudaha Waaxda Xaalada degdega waxaadna tageysaan qolka shaqada ama sugitaanka. Karraaniga ayaa ku weydiin doonaan su'aalo. Waxaa laga yaabaa in ay dhacdo sugis ka hor inta uusan dhakhtar arkin. Fadlan nala soo socodsii haddii aad ka welwelsan tahay in ilmahaagu kasii daraayo.

Inta aad sugayso, haddii aad awooddo, ka fikir jawaabahaaga su'aalahaaan soo socda.

Waa maxay sababta uu ilmahaagu maanta isbitaalka u yimid?

- Muddo intee le'eg ayay tani socotay? Maxaad u malaynaysaa inay sababtay? Miyay horey u qabeen tan?
- Miyay xanuun dareemayaan?
- Miyay wax cunayeen/cabayeen/aadayeen musquusha?
- Miyaad kala hadashay dhakhtar kale dhibaatadan?
- Ma qof kale ayaa kuu sheegay inaad imaato ED?
- Ma jiraan baaritaanno ama raajoojin la sameeyay ka hor intaadan imaanin ED?

Waa maxay taariikhda caafimaad ee ilmahaaga?

- Hadda miyay daryeel ka helayaan xirfadle caafimaad? (Tan waxa kale oo ka mid ah caafimaadka dhimirka)
- Waa maxay xaaladaha ama jirrooyinka kale ee ay hadda qabaan? (Marka laga hadlaysa Ilmaha, shaqaaluhu waxa laga yaabaa inay wax kaa weydiyaan dhalashada)
- Waa maxay xaaladaha, jirrooyinka ama qallinka ay horey u qabeen?
- Tallaaloododu ma yihiin kuwii ugu danbeeyay?
- Ma jiraan xaalado ama jirro taariikhda qoyska kujirto oo aad jeelaan lahayd inaad nala wadaagto?

Daawooyinkee ayuu ilmahaagu qaadanayaa?

- Daawooyinkee ayay qaateen dhawrkii maalmood ee lasoo dhaafay (ay ku jiraan antibiyootiga)?
- Waa maxay magaca daawadu, cadadka/qiyaasta iyo inta jeer ee ay iyada qaadanayaa?



- Waa maxay kaabista, fiitamiinada, ama daawa dhireed uu ilmahaagu qaatay maanta, ama si joogto ah u qaato?
- Dhawaan miyay joojiyeen daawooyin?

Waa maxay xasaasiyadda uu ilmahaagu qabo?

- Tan waxaa ka mid ah falcelinta ka dhalata cuntada, daawada, qaniinyada shinida, iyo alaabta sida latex ama mara ku xirida boogta (kuwaas waa la xaqijin karaa ama waa la tuhmi karaa).

Ma jiraan wax kale oo Aad u malaynayo inay tahay inaan ogaano?

- Ilmahaagu ma la kulmay wax jah-wareer ah oo la xidhiidha daryeelkooda caafimaad ama daaweyntooda?
- Adiga ama ilmahaagu ma qabaa baahi dhaqan, bulsho, luqad, qoys ama hab-dhaqan?
- Goorma ayay ahayd markii ugu dambaysay ee ilmahaagu uu wax cuno ama cabbo?



Marka aad la kulmeyso kalkalisada ama dhakhtarka

Waxay ku weydiin doonaan su'aalo waxayna eegi doonaan ilmahaaga si ay gacan uga geysato fahmka waxa khaldan.

Waxaad codsan kartaa inaad kula hadasho dhakhtarka meel ka fog ilmahaaga.

Dhalinyarada qaangaartay waxay codsan karaan inay kula hadlaan dhakhtarka/kalkaaliyaha meel ka fog waalidkood.



Kala hadal kalkalisadaada ama dhakhtarkaaga

Dhakhtarka ama kalkalisada ayaa kuu sharxi doona waxa khaldan iyo waxa ilmahaagu u baahan yahay.

Weydii su'aalo wakhti kasta.



Baaritaanada iyo daawaynta

Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu u baahdo baaritaan dhiig, raajo, ama baaritaanno kale si loo ogado waxa qaldan. Wuxuu kala duujiyo inay helaan daaweyn inta ay ku sugan yihiin ED. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad sugto natijjada baaritaanka ama aad aragto sida ilmahaagu uga falcelinayo daawaynta.



Ku noqoshada guriga ama isbitaal dhigida

Iyada oo ku xidhan xaaladda ilmahaaga, waxaad awoodi doontaa inaad guriga aado, wakhti dheer joogtid si dhakhtarkaagu ugu kuur galo ilmahaaga, ama lagu dhigo isbitaal.

Aadida guriga

Marka ilmahaagu diyaar u yahay inuu guriga aado, dhakhtarka ama kalkalisada ayaa ku siin doona xoogaa macluumaad ah oo ku saabsan waxaad u baahan tahay inaad samayso si aad u daryeesho ilmahaaga, kaas oo ay ku jiraan xaashi ay ku qoran tahay xog ku saabsan xaalada ilmahaaga iyo warqad loo geynayo dhakhtarkaaga deegaanka. Haddii adiga ama ilmahaagu u baahan yahay shahaado caafimaad, fadlan u sheeg dhakhtarkaaga ama kalkalisada ka hor intaadan bixin. Na weydii wixii su'aalo ah ee aad qabtid.

Markaad guriga joogto, fadlan raac tilmaanta uu dhakhtarku ku siiyo. Haddii aad ka welwesan tahay in ilmahaagu aanu ka soo raynaynin, waxaad awood u yeelan kartaa:

- inaad booqatid dhakhtarka deegaankaaga
- aad ka wacdid Health Direct lambarka [1800 022 222](tel:1800022222)
- aad booqatid [GP Urgent Care Clinic \(Rugta Daryeelka Degdegga ah ee Dhakhtarka Guud\)](#)
- Haddii ay tahay xaalad degdeg ah, wac [000](#)si aad ambalaas u heshid ama ku soo noqo Waaxda Xaalada degdega

Haddii la dhigo isbitaalka

Waxaa laga yaabaa in ilmahaaga la dhigo isbitaal si loogu sameeyo baadhitaano dheeraad ah iyo/ama daawaynta iyadoo ay la soconayaan kooxda Xaalada degdega ama dhakhtarka takhasuslaho ah. Hadafkeenu waa inaan ku siino daryeel gurigaaga u dhow, marka waxaa laga yaabaa inaan u wareejino ilmahaaga qaybta carruurta ee isbitaalka deegaankaaga si loogu daweyyo ama aad u heshid booqashada kalkaliyayaasha Hospital in the Home (HiTH) si ay kuu siiyaan daryeel una eegaan ilmahaaga.


Haddii aad u baahan tahay inaad joogtid Perth Children's Hospital waxaa laga yaabaa in laguu wareejijo qaybleena Emergency Short Stay Unit (ESSU) ama qaybta jiifka ee isbitaalka.

Haddii ilmahaaga loo gudbiyo ESSU, waxay kujiri doonaan daryeelka kooxda Xaalada degdega. Haddii

ilmahaagu u baahan yahay daaweyn ama qalliiin dheeraad ah, waxaa loo gudbin doonaa qaybta jiifka ee isbitaalka.

La kulan kooxdaada daryeelka caafimaadka

Waxaa jira dad badan oo kaa caawinaya daryeelka ilmahaaga.



Waxaan leenahay shaqaale caafimaad oo Aboriginal ah oo la heli karo maalmaha shaqada inta badan kaasoo gacan ka geysan doona bixinta daryeelka gudaha ED. Fadlan codso haddii aad jeelaan lahayd inaad iyaga aragto.



Haddii aad u malaynayo in ilmahaagu xanuun dareemayo

Fadlan la hadal kalkaalso qiimeye doonta ilmahaaga oo qabanqaabin doonta xanuun baabiiyaha ku habboon.

Miyaad ka welwesan tahay in ilmahaagu ka sii darayo? Waxaan u baahanahay inaan ogaano

Haddii ilmahaagu u muuqdo inuu kasii daraayo ama u dhaqmayo si aan caadi ahayn, isla markiiba noo soo sheeg. Ilmahaaga si fiican ayaad u taqaanaa. Waanu ku dhagaysan doonaa



The image shows three horizontal cards, each with a different color and a corresponding step number (1-aad, 2-aad, 3-aad) and a small icon. The first card is green and contains text in English. The second card is orange and also contains text in English. The third card is red and contains text in English. All cards have a speech bubble icon.

Talaabada	Step	Description
Green	1-aad	Miyaad ka welwesan tahay isbeddel ku yimid Xaaladda Ilmahaaga? Noo sheeg.
Orange	2-aad	Weli welwel miyaa ku haya? La hadal xubin khibrad sare leh oo shaqaalaha ka tirsan.
Red	3-aad	Haddii welwelkaagu yahay mid degdega wac 6456 0337

Haddii aadan luuqada Ingiriisiga si fiican u aqoon dheh 'Emergency Waiting Room (Qolka Sugitaan Xaalada Degdega)' ama lambarka qolkaaga.

Aaway...

Musqulaha

- Musql la isticmaali karo ayaa ku taala gudaha ED, dhanka bidix ee albaabka laga soo galoo
- Dhanka dambe ee ED, oo ku xiga qolka sugitaanka ee Pod C, baarka Cabitaanka gadaashiisa

Fadlan raac calaamadda ama weydii xubin ka tirsan shaqaalaha haddii aadan hubin.

Qolka barbaarinta

- Miiska dhar beddelka ilmaha ayaa ku yaal gudaha ED, oo ku xiga musquusha la isticmaali karo, daaha buluugga ah gadaashiisa
- Miis dhar beddelka ilmaha ee labaad ayaa ku yaal mid ka mid ah musqulaha u dhow Pod C

Tuubooyinka biyaha laga cabo

Biyo ayaa laga heli karaa Goobta Cabitaannada ee u dhow aagga sugitaanka ee Pod C.

Cunto iyo cabitaan

- Tas-hiilaadyo laga helo shaaha iyo kafee lacag la'aan ah ayaa ku yaalaan Goobta Cabitaanka ee gudaha ED meel u dhow goobta sugitaanka ee Pod C
- Mashiinnada dadka iibiyaa cuntada fudud iyo cabitaanada waxay ku yaallin bannaanka ED meel u dhow wiishashka Cagaaran
- [Little Lion Cafe](#) waxay u dhowdahay albaabka weyn ee Dabaqa Hoose
- [The Food Hall](#) wuxuu ku yaalaa Level 1, lagana isticmaali karo iyada wiishashka Binkiga ah ama jaranjarada ku taala bannaanka Little Lion Cafe ee Dabaqa Hoose
- D [Dukaan yar oo habboon, Xpress Zone](#), wuxuu ku yaal dabaqa Dhulka ee QEII multideck carpark wuxuuna furan yahay Isniinta ilaa Sabtida, 7am ilaa 8pm.

Taleefannada lacagta lagu shubto ee dadweynaha

Waxaa laga heli karaa bannaanka ED ee marinka isku xira ED iyo isbitaalka.

ATM

Waxaa laga heli karaa bannaanka ED ee marinka isku xira ED iyo isbitaalka.

Badqabka iyo amniga

Badqabkaaga iyo amnigaaga ayaa muhiimad weyn noo leh. Haddii aad aragto habdhaqan kasta oo aad ka walaacsan tahay, ama aad dareemayso inay saamayn kugu yeelan karto adiga ama badqabka ilmahaaga, fadlan la xidhiidh xubin shaqaalaha ka tirsan ama PCH Security lambarka [6456 3003](#) isla markaaba

Looma dulqaadan karo xadgudubka

Si loo xaqijiyo badqabka qof walba, waxaa noo degsan shuruuc aan u dulqaadanayn xadgudubka iyo dabeeecadaha dagaalka keena.



Qof kasta oo jidh iyo af ku aflagaadeeya ama leh dabeecadaha dagaalka badan waxa laga codsan doonaa in uu si degdeg ah uga baxo goobta, haddii loo baahdo waardiye ayaa la dalban doonaa.

Qaadista sawiro ama filin duubida

Qarsoodinimada iyo asturnaanta bukaanadeena, qoysaskeena, daryeelayaasheena iyo shaqaalaheena, fadlan ha qaadin sawiro ama filin duubis inta aad PCH joogto.

Bogaadin iyo cabashooyin

Ra'yigaaga, mid fiican iyo mid xunba, waxay naga caawinaysaa inaan adiga iyo ilmahaaga ku siino adeeg ka wanaagsan.

Kadib booqashadaada ED, waxaa laguu soo diri doonaa qoraal si laguu weydiyo ra'yi-celintaada iyada oo loo marayo ra'yi uruurinta MyVisit. Fadlan buuxi ra'yi-ururintan kooban si aad noogu sheegto khibradaada. Wuxaad sidoo kale noo dhaafi kartaa [bogaadin ama cabasho](#) adoo adeegsanaya websaydkeena.

Gobolka Western Australia, Adeegga Caafimaadka Carruruuta iyo Dhalinyarada. Ref.no 1416. © CAHS 2022.

